

## Alberta waxay gaartay marinka 70%, taasoo horseed dib u furida buuxda ee 1da Luuliyo

Juun 18, 2021

---

Alberta waxay gaartay dhamaadka marinka ee U Furan Xagaaga (Open for Summer), taasoo sabab u ahayd sugitaanka mudada labada todobaad kahor intaysan bilaabin Wajiga 3.

Dadka reer Alberta oo u qalmay ayaa boqolkiiba 70.2 helay uguyaraan hal qiyaas oo talaal ah illaa Juun 17, Alberta waxay aadi doontaa Wajiga 3aad ee 1da Luuliyo oo ay si buuxdana dib u furi doonto, loona qaadi doono dhammaan xayiraadaha lama huraanka ah.

Qof kasta oo reer Alberta ah oo ay da'diisu tahay 18 ama ka weyn ayaa weli ka mid noqon kara isku aadka koowaad ee bakhtiyaanasiibka ee U Furan Xagaaga una tahay fursad uu ku guuleysto hal milyan doolar (One million dollars). Waxay isdiiwaan galinta ku ektahay 11:59 ee saqda dhexe. Caddeynta tallaalka ayaa loo baahan doonaa 24ka Juun si loo codsado abaalmarinta.

Qofka ku guuleysta waxaa lagu dhawaaqi doonaa 1da Luuliyo, oo Albertana ay si rasmi ah u bilowdo Wajiga 3.

### Xayiraadaha la fududeeyay wejiga 3aad ee Qorshaha U Furan Xagaaga, dhaqan galka ah 1da Luuliyo.

- Xayiraadaha haray dhamaan ayaa la qaadi doonaa, oo ay ka mid yihiin kulammada bulshada gudaha oo aan la ogoleyn.
- Shuruudaha go'doominta ee kiisaska la xaqiijiyay ee KOOFID-19 iyo tallaabooyinka ka hortagga ee goobaha daryeelka joogtada ah ayaa weli jiri doona.
- Amarada guud ee af xirashada gobolka ayaa la qaadi doonaa, laakiin waxaa af xirashada looga baahan doonaa goobo kale oo cayiman,

Dadka reer oo Alberta oo 70.2 boqolkiiba eena ah 2.671.564 ee xaqa u lahaa ayaa helay qiyaastoodi koowaad, oo ay ku jiraan in ka badan 25 boqolkiiba kuwa si buuxda loogu tallaalay labada qiyaasood.

Si aad u qabsato balanta tallaalka ee KOOFID-19, booqo [alberta.ca/vaccine](https://alberta.ca/vaccine) saad uga hesho ballamo Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) ama farmashiyeyaasha ka qaybgalaya ee ku baahsan gobolka. Goobaha la xushay waxay bixiyaan adeega tallaalka ee qiyaasta koowaad ee aan balan horey u laheyn.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 oona ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka loona marayo tallaabooyin sax ah oo lagu taageerayo ganacsiyada yaryar, laguna ilaaliyo nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

### Xogtala xiriirta

- Qabso ballantaada tallaalka ([Book your vaccine appointment](#))
- Iska diiwaangali bakhtiyaanasiibka ee U Furan Xagaaga ([Register in the Open for Summer Lottery](#))

## Weydiimaha Warbaahinta

Jerrica Goodwin

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

Tom McMillan

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

*Si aad u hesho xog badan oo loo turjumay dowladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.*